Dadku haday arkaan daalimka oo ay gacmaha ka qaban waayaan waxay u dhowdahay in Ilaahay ciqaabkiisu ku wada dhoco

Abii Bakar Sadiiq-Allaha ka raalli ahaadee-waxaa laga wariyey inuu yiri: Dadow waxaad akhridaan aayadan: {kuwa iimaanka lahoow, naftiinaa ayaad masuul ka tihiin, oo waxba idin yeelimaayo midka xaqa diiday hadaad idinku hanuuntaan}, waxaan ka maqlay Rasuulka Ilaahay -naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- isagoo dhahaya: "Dadku haday arkaan daalimka oo ay gacmaha ka qaban waayaan waxay u dhowdahay in Ilaahay ciqaabkiisu ku wada dhoco."

[Xadiis Saxiix ah] [Waxaa wariyey Abuu daawuud,tirmidi,nasaa.i,ibn maajah,Axmad]

Abuu bakar -Allaha ka raalli ahaadee- wuxuu sheegay in dadku akhriyaan aayadan: {kuwa iimaanka lahow naftiina ayaad masuul ka tihiin, oo waxba idin yeelimaayo midka xaqa diida hadaad idinku hanuuntaan} [al-ma`ida:105]. waxayna ka fahmayaan in qofka ay waajib ku tahay inuu islaaxiyo naftiisa oo qura, intaa ka dibna dhibimayso baadida qofkii baadiyooba, oo dadka laga doonimaayo inay wanaaga faraan oo xumaanta reebaan. Waxaanse u sheegay inuusan arinku sidaa ahayn, oo inuu ka maqlay Nabiga -naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaate-isagoo dhahay: Dadku haday arkaan daalimka oo ay dulmiga ka celin waayaan, iyagoo awood u leh inay ka celiyaan, waxay u dhawdahay in Ilaahay ciqaabkiisku ku wada dhaco, kan xumaanta samaynaya iyo kan ka aamusanba.

http://www.sunnah.global/hadeeth/so/show/3470